County of San Diego



# Dhisidda Mustaqbalka

Qorshe Howleedka La meelmariyay ee 2022-23

## Dulmarka Guud



**Nora Vargas**
Korjooge
Degmada Koowaad



**Joel Anderson**
Korjooge
Degmada Labaad



**Terra Lawson-Remer**
Korjooge
Degmada Saddexaad



**Nathan Fletcher**
Korjooge
Degmada Afaraad



**Jim Desmond**
Korjooge
Degmada Shanaad

**Helen N. Robbins-Meyer**
Sarkaalka Madaxa Maamulka

**L. Michael Vu**
Kaaliyaha Sarkaalka Madaxa Maamulka



**Helen N. Robbins-Meyer**
Sarkaalka Madaxa Maamulka

## Fariinta Qorshe Howleedka la Meelmariyay

Anaga oo caawintaada isticmaalayna, waxaan dhisaynaa mustaqbalka County of San Diego!

Mustaqbal ah, mid waara oo adkaysi leh. Kaasoo ay ka go'antahay sinaanta cidwalba. Xooggaan si uu ugu adkaysto dhibaatada iyo dib u noqoshada. i xeeldheerna looga fakaray si sare loogu qaado hormarka walina ilaalinaya deegaankeena iyo ilaheena dabiiciga ah ee jiilasha mustaqbalka imaan doona.

Miisaaniyadeena cusub ee $7.36 bilyanka ah ee miisaaniyad sanadeedka 2022-23 ayaa waafaqsan hiigsigaas, dhisidda hanaanka shaqaada ee Gudigeenna Kormeereyaasha ah ayaa la diyaariyay.

Waxaa kamid ah kaalmada lagu badelayo hanaankeena habdhaqanka caafimaadka iyo la tacaalidda isticmaalka maandooriyaha. Maalgalinta si loo abuuro goobo ay joogaan dadka wajahaya hoy la'aanta. Lacag iyo shaqaalaha lasoo kordhiyay si loo taageero qoysaska guriga jooga iyo kuwa shaqada jooga. Tallaabooyinka iyo xaafiisyada cusub si loo taageero cadaaladda asalka ku salaysan iyo sinaanta ayada oo la adeegsanayo adeegyadeenna. Maalgashiga bulshadeenna dhexdeeda ah, ee ka imaanaya goobaha cusub ee la gaarsiinayo beeraha bulshada. Shaqaalaha iyo ilaha ka caawinaya soogalootida in ay gurigooda cusub la qabsadaan. Waxaa kamid ah tallaabooyinka si aad wax looga qabto isbadalka cimilada iyo cadaaladda deegaanka. Waxayna kordhinaysaa isticmaalka xogta si loo soo saaro go'aano iyo natiijooyin cabiraad.

Ayada oo lagu dadaalayo ahdaafta cusub, waxaan sii wadaynaa Inaan bixino adeegyadeenii aasaasiga ahaa ee horeyba aan u bixin jirnay, anaka oo u isticmaalayna si mas'uuliyad ah caafimaadka iyo adeegyada bulshada, badqabka bulshada iyo isticmaalka dhulka.

Miisaaniyadda cusub waa mid 1.8% ka saraysa tii sannadkii hore, waxay sare u qaadaysaa adeegyada waxayna soo kordhinaysaa shaqaale kuu shaqeeya.

Tusaale ahaan, 100 oo boosas cusub ah si ay gacan uga gaystaan helitaanka cuntada, daryeelka caafimaadka iyo adeegyada kale ee aasaasiga ah ee loogu tala galay dadka u baahan. Boqol boos oo cusub oo loogu talagalay Adeegga Daryeelka Caruurta iyo 40 loogu tala galay Adeegyada Kaalmada loogu tala galay xoojinta qoysaska. Boqol iyo toban iyo shan boos si loo sii wado kasoo jihaynta hanaanka yaga habdhaqanka caafimaadka ka jawaabista dhibaatada ayada oo loosoo celinayo daryeel aan kala joogsi lahayn. Sagaashan boos oo loogu tala galay Difaacaha Bulshada si uu u siiyo difaac dhanka sharciga ah sare ugu qaado u wareegidda kusoo laabashada bulshada. Iyo 71 boos oo cusub oo loogu tala galay caafimaadka bulshada si sare loogu qaado awoodda caafimaadka bulshada.

Miisaaniyaddeenu waa mid qof walba kujiro, waxaana diyaariyay dadaalka bulshada kala duwan iyo qiimaynta sinaanta dhammaan howlaheena si loo sii wado in meesha laga saaro dhibaatooyinkii muddada badan soo jiray ee bulshadeena dhexdeeda ahaa.

waxaa lagu saleeyay halkaan iyo hadda — iyo dhisidda mustaqbalka San Diego County.

## Dhisidda Miisaaniyad Loogu tala galay Cid walba

Yoolka County of San Diego waa mustaqbal, waara adkaysina leh oo cid walba ay hesho. Waxaa taageeraya hindiseyaashaan istiraatiijiyadeed.




## Hanaanka Guud ee Maaraynta Caafimaadka

### Waxaan ahdaaftaas ku gaaraynaa marka aan adiga kula shaqayno - bulshada.

Ka qaybgalka bulshada waa laf dhabarta hanaanka shaqada, qiyamkeenuna wuxuu ku wareegsan yahay qaabkaas si uu noogu hago waxa aan qabanayno.




Si aad u hesho macluumaad dheeeraad ah oo ku saabsan miisaaniyadda Ismaamulka booqo: **www.sandiegocounty.gov/openbudget**

## Taariikhaha Muhiimka ah ee Miisaaniyadda

| Maajo 5 | Maajo 19-20 | Fogaan aragga Kulamada Miisaaniyadda ee Bulshada | Juun 13 @ 9:00 Subaxnimo<br>Juun 16 @ 5:30 Galabnimo | Juun 24 | Juun 28 |
|---|---|---|---|---|---|
| CAO Shaacinta Miisaaniyadda Lasoo jeediyay ee loo gudbinaayo Bulshada | CAO Bandhigyada Miisaaniyadda Lasoo jeediyay | 5/23: Degmada 3<br>5/31: Degmada 4<br>6/2: Degmada 1<br>6/6: Degmada 5<br>6/8: Degmada 2 | Dhegaysiga Bulshada ee Miisaaniyadda Lasoo jeediyay | CAO Shaacinta Miisaaniyadda Lasoo jeediyay ee loo gudbinaayo Bulshada | Dhaqan galinta iyo Isticmaalka Miisaaniyadda |

## Sida Looga Qaybqaato

Ka qaybqaado bandhigyada miisaaniyadda, dhegaysiga, dhaqangalinta iyo isticmaalka soo socda Kulamada Guddiga Korjoogeyaasha ah.

**Daawo:** Cable TV, Xarunta Wararka Ismaamulka, Webseedka Ismaamulka, Vimeo Livestream, YouTube, Facebook, Twitter

**Ka dhegayso teleefoonka:** (619) 531-4716

@countyofsandiego @sandiegocounty @countysandiego @Sandiegocounty

**Faalo ka bixi**

- www.sandiegocounty.gov/cob/bosa/
- Adiga oo dhegaysanaya teleefoonka ama si fool-ka-fool ah dhegaysiga miisaaniyadda
- Oonleen ah ilaa Juun 22
- Tarjumaan ka codso **(619) 531-5434** ama **PublicComment@sdcounty.ca.gov**

## Miisaaniyadda Aaladda Qiimaynta Sinaanta

Aaladdu waa su'aalo weydiin waaxaha u horseedaysa faham wanaagsan oo ku saabsan qaabka miisaaniyadahooda u gaarka ah u saameeyaan bulshooyinka taariikh ahaan la gacan bidixeeyo. Waxay samaynaysaa hab shaqo oo loogu tala galay goobaha ilaha sare u qaadaya sinaanta.

**Waxyaabaha Sinaanta laga eegayo**
U isticmaalidda waxyaabaha sinaanta lagu eego dhammaan waaxaha

**Ka qaybgalka Bulshada**
Awoodda ka qaybgalka

**Xogta**
Ka faa'iidaysiga xogta sinaanta gaarka ah ee waaxda


**Isla xisaabtan**
Xaqiijinta isla xisaabtanka

County of San Diego

# XOGTA GOBOLKA

## Celceliska Dakhliga Qoyska

| 2018 | 2019 | 2020 |
|---|---|---|
| $74,855 | $78,980 | $82,426 |



18 Magaalo oo aan la Deganayn | Goob aan La daganayn

## Dadweynaha

| | |
|---|---|
| 2019 | 3,340,312 |
| 2020 | 3,331,279 |
| 2021 | 3,315,404 |

## Shaqaalaha rayidka ah

| | |
|---|---|
| 2019 | 1,590,600 |
| 2020 | 1,538,400 |
| 2021 | 1,543,700 |


## Heerka Shaqo la'aanta

| 2020 | 2021 | Febraayo 2022 |
|---|---|---|
| 9.2% | 6.5% | 4.0% |

## Celceliska Qiimaha Guriga

| Guryaha Qoyska Kaliga ah | | | Guryaha Isku dhagan | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Janaayo 2020 | Janaayo 2021 | Janaayo 2022 | Janaayo 2020 | Janaayo 2021 | Janaayo 2022 |
| $670,000 | $744,000 | $885,000 | $435,000 | $485,000 | $595,000 |

**Bulshada San Diego County Sida ay kala yihiin marka lagu saleeyo Qowmiyada, Isirka iyo Da'da**
**2020 Wadarta Dadweynaha 3,343,349**




Source: San Diego Association of Governments 2020 Demographic & Socio Economic Estimates, as of July 2021 relects latest data available.

- Mashaariicda SANDAG dadweynaha San Diego waa uu sii kori doonaa asaga oo kala duwan marka la gaaro 2035, taasoo lagu qiyaasayo: 36.3 % Caddaan, 41.4% Hispanic, 13.9% Eeshiyaan iyo Pacific Islander, 4% Madow iyo 4.4% dhammaan kooxaha kale oo ay kujiraan Hindida Maraykanka ah.

- San Diego County waxay leedahay tirada ugu badan ee goobaha dadka Hindida ah ee Ismaamul kasta gudaha Maraykanka – 18

Si aad u hesho macluumaad dheeeraad ah oo ku saabsan miisaaniyadda Ismaamulka bookho: **www.sandiegocounty.gov/openbudget**

## 2022-23 Miisaaniyadda La meelmariyay

Wadarta Miisaaniyadda La meelmariyay: $7.36 bilyan

**Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada**
$2,815.1M (38.3%)


**Isticmaalka Dhulka iyo Deegaanka**
$629.9M (8.6%)

**Badqabka Bulshada**
$2,500.9M (34.0%)

**Dhaqaalaha iyo Dowladda Guud**
$815.6M (11.1%)


**Dhaqaalaha Kale**
$426.1M (5.8%)

**Barnaamijka Capital**
$171.8M (2.3%)



Qoondaynta wadarta $7.36 bilyan oo ah Miisaaniyadda La meelmariyay Miisaaniyad Sanadeedka 2022-23. Arintaani waa koror 1.8% ah oo lagu sameeyay Miisaaniyaddii La meelmariyay Miisaaniyad Sanadeedkii 2021-22.






## Shaqaalaysiinta Guud Koox/Hay'ad ahaan

**19,848 (+1,065 / +5.7%)**

| CAAFIMAADKA IYO ADEEGGA BULSHADA | ISTICMAALKA DHULKA IYO DEEGAANKA | BADQABKA BULSHADA | DHAQAALAHA IYO DOWLADDA GUUD |
|---|---|---|---|
| **7,879** | **2,026** | **8,015** | **1,926** |
| **(+595 / +8.2%)** | **(+171 / +9.2%)** | **(+181 / +2.3%)** | **(+118 / +6.5%)** |

**Ogsoonow:** Tirada shaqaalaysiinta waxaa kamid ah shaqaalaha gelinka shaqeeya waxaana dhici karta in aysan tiradaas gaarin ayada oo ay sabab u tahay isbadbadalka tirada.




In ka badan 2,200 oo shaqaale ah ayaa la soo kordhiyay shan sano si sare loogu qaado waxyaabaha muhiimka ah, oo ay kamidka yihiin barnaamijyada caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka maandooriyaha, hoy la'aanta, daryeelka caruurta iyo adeegyada isku filnaanshaha, dib u habaynta cadaaladda, iyo kaalmo caafimaadka dhimirka iyo caafimaadka ah oo laga helo xabsiyada.

## Maalgalinta Muhimdsiinta

### CAAFIMAADKA DHIMIRKA
### IYO KAALMADA ISTICMAALKA MAANDOORIYAHA

- $81.9 milyan oo dheeraad ah iyo 115 boos si loo sii wado wax ka badelka hanaanka habdhaqanka caafimaadka ayada oo laga soo badalayo jawaabta kahortagga qalalaasaha loona badalayo daryeel soconaya
- Adeegyada la hormariyay si dadka looga caawiyo caqabadaha caafimaadka dhimirka iyo dhibaatooyinka ka yimaada isticmaalka maandooriyaha, ayada oo diiradda la saarayo dadka horaan si aan la ogayn ula dhibtooday, oo ay kamid yihiin dadka wajahaya hoy la'aanta iyo dhalinyarada
- Maalgalinada lagu taageerayo Kooxda Ka jawaabidda Qalalaasaha ee Guurguurta, kuwaas oo ka kooban khubarada caafimaadka dhimirka badalkii ay ka noqon lahaayeen hay'adaha sharciga
- Ilaha nooca adeegga saxda ah loogu hagaajinayo qofka u baahan — daryeelka dib u xoojinta, adeegyada dugsiga ku saabsan, adeegyada loogu tala galay dhalinyarada la koriyo, dadka kujira adeegyada daryeelka muddada dheer iyo bulshada LGBTQ









### SINAANTA IYO HELITAANKA

- Dhaqangalinta Socota ee Aaladda Qiimaynta Sinaanta Miisaaniyadda kaasoo ka caawinaya waaxyaha Ismaamulku muhiimad ku siinayo adeegyada iyo qoondooyinka ayada oo sinaanta lagu xisaabtamayo
- Ilaha la soo kordhiyay ee loogu tala galay ka qaybgalka bulshada si fursado loo siiyo dhammaan xubnaha bulshada in ay kaalimo wax ku ool ah ka cayaaraan wadaxaajoodyada iyo ga'aan gaarista
- Kordhinta adeegyada tarjumaadda iyo fasiraadda waxay helitaan balaaran siin doontaa adeegyada iyo macluumaadka
- Xaafiis cusub oo loogu talagalay Waaritaanka iyo Caddaaladda Deegaanka waxaa lagu maalgaliyay $3.5 milyan iyo shaqo si loo xaqiijiyo in dhammaan bulshooyinku ay difaac iskumid ah oo ka dhan ah khataraha caafimaadka haystaan
- San Diego County Office of Labor Standards and Enforcement wuxuu noqon doonaa goobta xarunta u ah waxbarashada iyo ilaha loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalahooda lagana helo tallaabooyinka sharciga si shaqaalaha loo ilaaliyo

## Maalgalinta Muhimdsiinta

### HOY LA'ANTA IYO GURIYEYNTA

- Maalgalinta la kordhiyay waxaa kamid ah $11.9 milyan oo laga keenayo sanduukha kobcinta oo halmar ah kaasoo loogu tala galay guriyaynta jaban si loo yareeyo hoy la'aanta
- $10 milyan oo u diyaarsan magaalooyinka ku yaala dhammaan ismaamulka si loogu iibiyo hoy iyo goobo la galo si loo caawiyo dadka wajahaya hoy la'aanta ee guud ahaan gobolka
- $3 milyan si looga daayo kharashka oggolaanshaha si loo dhiirigaliyo dhisidda qaybaha wanaagsan ee guryaha
- $810,000 si loogu abuuro sharci kala xadayn dhammaystiran kaasoo shirkadaha cusub ee dhismaha guryaha shardi uga dhigaya ku daraan guriyaynta dadka kujira ama ka hooseeya heerarka dakhliga dhexe ay awoodaan










### WAARITAANKA IYO LA DAGAALANKA ISBADALKA CIMILADA

- Wax ka badan $25 milyan ayaa lagu maalgalin doonaa si loo yareeyo sii daynta neefta hawada wasakhaysa ee bulshooyinkeena, oo ay kamid tahay $1 milyan oo lagu taageerayo xarumaha gawaarida koronto ahaan looga dabaysto
- Ku dhawaad $60 milyan ayaa lagu kharashgarayn doonaa hormarinada kale ee deegaanka, oo ay kujirto $40 milyan oo wax looga qabanayo biyaha daadadka ah, $16.3 milyan oo lagu bixinayo Barnaamijka Ilaalinta Noocyada Badan(Multiple Species Conservation Program) iyo $3.4 milyan oo lagu hormarinayo Tijuana River Valley
- Dhisidda cagaaran iyo tamarta ilayska qoraxda laga dhaliyo ayaa sare loo qaadi doonaa ayada oo laga dhaafayo kharashka ogolaanshaha oo qiyaastii gaaraya $2.1 milyan
- Wax ka badan 3,500 oo eed ayaa lagu talaali doonaa ismaamulka
- $2 milyan oo loogu tala galay gawaarida Live Well on Wheels iyo sheybaar cusub oo loogu talagalay caafimaadka bulshada kaas oo guurguura si adeegga loogu keeno dadka deegaanka, ka saarista gawaarida jidadka si loo yareeyo sii daynta gaasaska hawada wasakheeya

## Maalgalinta Muhimdsiinta

### DIB U HABAYNTA CADAALADDA

- Ilaha loogu tala galay Badalka hindiseyaasha Xabsiyada, taageerooyinka badalka ah ee xabsiga, iyo adeegyada iyo daryeelka dadka kuwaas oo aan keenayn khatar ku timaadda caafimaadka bulshada
- In ka badan $140 milyan ayaa lagu maalgeliyay adeegyada daryeelka caafimaadka ee xabsiyada Ismaamulka
- $6.2 milyan oo loogu Machadka Hormarinta Dhalinyarada (Youth Development Academy) si loo caawiyo dadka da' yarta ah ee galay danbiyada culus ayada oo la siinayo niyad dhis dheeraad ah, caafimaadka habdhaqanka ee muddada dheer, adeegyo xirfad dhisid iyo dhaqan celin
- $1 milyan oo ku socota tababarka xasilinoonta xiliga shaqada ee loogu tala galay shaqaalaheeda, ayaka oo taageeraya dadka da' yarta ah ee ay korjoogtaynayaan
- $2.4 milyan oo dheeraad ah oo loogu tala galay Barnaamijka Juvenile Diversion Initiative and Transitional Age Youth Diversion ee xafiiska Garyaqaanka Degmada si uu dadka aan qaangaarin u siiyo fursad ay ku aqbalaan adeegyada iyo la talinta badalkii la maxkamadayn lahaa
- Xafiiska Difaaca Dadweynaha waxay kusoo dari doonaan $21.8 iyo 90 shaqaale ah si ay u difaacaan macaamiisha, u matalaan soogaloootida faqriga xaafadaheena kajira, sarena loogu qaadayo kala guurka kusoo noqoshada bulshada.
- $3.5 milyan iyo 18 boos oo dheeraad ah si loo balaariyo adeegga uu Garyaqaanka Degmadu siinayo dhibaneyaasha danbiga, oo ay kamid yihiin South Bay Center for Community Resiliency iyo Trauma Recovery, barnaamij mar labaad la xukumayo










## Maalgalinta Muhimdsiinta

### SARE U QAADIDDA BULSHOOYINKA IYO ILAALINTA NABADGALYADOODA

- $2.9 oo loogu talagalay goobta badqabka bulshada ee mustaqbalka ee Interstate 15 iyo State Route 76
- $250,000 si loo bilaabo qorsheyaasha loona naqshadeeyo xarun dabdamis cusub oo Jacumba yeelanayso
- $2.2 milyan dheeraad ah si loo ilaaliyo bulshada loona yareeyo khatarta dabka kaymaha uu ku leeyahay meelaha aan la daganayn ayada oo la adeegsanayo maaraynta dhirta hareeraha waddada ku taala iyo abuurista hakinta dabka
- 71 boos oo cusub oo Adeegyada Caafimaadka Bulshada ah si loo sii wado xoojinta awooddeeda guud ee difaaca caafimaadka dadka deegaanka
- $1.4 milyan ayaa waxaa lagu kharashgaryn doontaa beeraha lagu nasto ee Ismaamulka oo ay kamid yihiin Calavo, Star Ranch, Lindo Lake, Park Circle iyo Waterfront Park
- $1 milyan ayaa lagu maalgalin doonaa Hindisaha Helitaanka Cuntada si gacan looga gaysto abuurista beeraha bulshada










### KAALMAYNTA QOYSASKA

- 60 boos oo cusub oo loogu tala galay Adeegyada Kaalmada ee Guriga la siiyo dadka waaweyn iyo dadka indhaha la' ama naafada ah
- 100 boos oo cusub oo loogu tala galay adeegyada aasaasiga ah waxaa kamid ah CalFresh iyo Medi-Cal, si dadka looga caawiyo in ay helaan cuntada iyo daryeekka caafimaadka ay u baahan yihiin
- 100 boos oo cusub oo loogu tala galay ka jawaabista xaaladaha degdega ah iyo gaynta caruurta xanaanada ee tayada leh, iyo in la xoojiyo adeegyada kahortagga iyo sii wadidda sare u qaadidda ku xirista qoysaska adeegyada bulshada
- $31 milyan oo ka imaanaysa Xeerka Qirshaha Badbaadada Maraykanka ayaa sii wadi doonta maalgalinta adeegyada kala duwan, oo ay kamidka yihiin adeegyada caafimaadka dhimirka ee loogu talagalay dadka yaryar, kaalmo la siinayo kiraysteyaasha iyo barnaamijyada nafaqada
- Xaafiiska Cusub ee Hormarinta Dhaqaalaha iyo Arimaha Dowladda wuxuu sare u qaadi doonaa koritaanka dhaqaalaha ee loo dhan yahay, wuxuu bixin doonaa fursado ku saabsan farshaxanka iyo dhaqanka, wuxuuna soo saari doonaa barnaamijyo deeq ah kuwaas oo diiradda saaraya ururada aan faa'iido doonka ahayn bulshadana ka socda
- Xaafiiska cusub ee qaabilsan ee Qiimeynta, Howl qabashada iyo Taxliilinta wuxuu isticmaali doonaa xog iyo taxliilino si fikrado wanaagsan looga helo go'aanada saamaynaya bulshooyinkeenna sare loogu qaado adeeg bixinta



County of San Diego

**www.sandiegocounty.gov**

1600 Pacific Highway, San Diego, CA 92101